

Somali

Xeerka aaggan ilaa iyo 22-ka yuunyo 2021.

Xeerka aagga degmadan Trondheim oo kooban oo hirgelaya laga bilaabo talaado 15-ka yuunyo 2021 saacadda 18.00.

- Waa amar in dadka ku tababbaranaya xarumaha tababbarku ay isu jirsadaan ugu yaraan labo mitir.
- Waa amar in la xaddido tirada ka qaybgalayaasha munaasabadaha.
- Waa amar in la joojiyo khamro gadistu saacadda 22 oo aan cidna aan la soo deyn wixii ka danbeeya saacadda 21 .
- Waa amar in khamro la gadi karo oo keliya ka dib kolka la dalbado ugu yaran hal saxan oo cunto ah.
- Goobaha cuntada iyo khamrada lagu gado waa inay diiwaan geliyaan qof kastoo macmiil ah kolka uu yimaado.
- Waa la xaddidayaa dadka waaweyn tirada ka qaybgaleysa nashoodooyinka isboortiga iyo xilliga firaaqada.
- Waa in tagaasida iyo gaadiidka dadweynaha la isticmaalo gafuur-xir. Teeda kale waxaa lagu talinayaa in la xirto gafuur-xir meelaha aadan dadka ka fogaan karin.

Qodabaddaas kala duwan oo faahfaahsan iyo talooyinka ay guddida sare ee degmadu iminka ay go'aamiyeen hoos ayaad ka akhrisan kartaa.

Xeerarka iyo talooyinka khuseeya Trondheim

Kulammada bulshannimada

Waxaa lagu taliyey in kulamada bulshannimo lagu xaddido ilaa 10 qof halkii usbuucba (tani ma khuseyso dadka guri wada deggan/shaqada/iskoolka).

Maxaa loola jeedaa kulammada bulshannimo?

Taladan yoolkeeda weyni waa in dadka dhexdiisa laga yareeyo faafitaanka caabuqa. Ma suuroobayso in lagu sheego hal xeer ama qoraalkan oo kale dhammaan nashaado kasta iyo xiriirka bulshannimo ee uu hal qof sameeyo hal usbuuc.

Tan ugu muhimsani waa in qofku hal mitir ka fogaado dadka kale, oo inta uu ka awoodo yareeyo kulanka dadka. Sidaa haddaynu yeello, cudur faafka ayaa yaraanaya. Meel fiican baynu ku gaaraynaa caqli suubban iyo waxoogaa taxaddar siyaado ah.

Dadka aad la kulmaysid

Kulanka bulshada waxaa loola jeedaa dadka caadiga ee aad la kulantid ee aad isla sheekaysataan. Kulanka bulshannimo wuxuu khuseeyaa dadka da' kastoo ay yihiin, xataa carruurta. Dhinac kasta oo baraatika ah marka laga eego waxay ku saabsan tahay dadka adigu aad meel gudaheed kula kulmaysid oo aad isaga dhowaanaysaan 1 mitir wax ka yar oo in ka badan 15 daqiiqo aad wada joogaysaan. Kuwaas waxaa kolkaa loo xisaabinayaa inay ka mid yihiin kuwa "qoondada" ku ah hal usbuuc, oo ah 7 maalmood.

Kolkaa haddii aad maqaaxi magaalada ah maalin isniineed gelinka danbe kula kulantid Per iyo Kari, kolkaa waxaa taas loo xisaabinayaa labo kulan bulsho. Haddii aad galab arboco ah baabuur isla raacdaan Ole, waxaad suubisay kulan bulsho oo saddexaad. Sidaas ayaad isugu xisaabinaysaa kulammada bulshannimo ee usbuuca ilaa inta ay isku noqonayaan 10. Haddii muddo toddobo beri ah aad suubisay shan kulan, waa in aad kulammo cusub sugtid ilaa inta ay toddobo beri ka dhammaanyaso. Kolka ay toddoba maalmood dhammaatay, waxaad haysataan 10 kulan oo cusub oo aad suubin kartaan.

Kuma jiraan (kulamada) kuwa shaqada iyo kuwa iskoolku

- Kuma xisaabinaysid kuwa aad kula kulantid shaqada iyo iskoolka.
- Waxaad kaloo aadan ku xisaabinayn dadka aad wada deggantihiin, waana dadka guriga ka tirsan. Waxaad kaloo ku xisaabinayn kuwa aad dukaanka kula kulantid (kuwaas oo ay tahay in aad masafo u jirsatid).
- Waxaan kaloo tiradaas lagu xisaabinayn carruurta tababar iyo wax la mid ah aadaya, ee la kulmayo carruur kale.

Xusuuso

Sida ugu fudud ee ku dhaqankeeda arrintan waa adoo kulammada bulshannimo u xisaabiya dadka aad la yeelatid kulan bulshannimo oo ka dhow hal mitir in cabbaar ah oo ka badan 15 daqiiqo.

Isu imaatan birifaati ah oo gurigaaga ka dhaca

Waxaa lagu taliyey in martida gurigaagu aanay ka badan 10.

Dadka ka difaacan cudurka koroonaha laguma xisaabinayo tirada 10 qof. Dadka ka difaacani waa dadka si buuxda loo talaalay, dadka hal talaal qaba muddo aan ka yarayn 3 usbuuc iyo kuwa uu caudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeysay. Waxaa qumman in dhammaan kuwa aan guriga ka tirsanayn ay kala fogaadaan ugu yaraan hal mitir.

Carruurta xannaanada carruurta iyo kuwa dugsiiga hoose way booqan karaan kuwa ay isku kooxda yihiin tiradana lagu xisaabinmaayo tirada lagu xaddidayo kulan bulsheedka.

Gafuur-xirka gudaha goobaha dadweynaha

Waxaa lagu talinayaa in dadka waaweyn iyo dhallinyarada jirta 12 sano iyo ka weyn ay isticmaalaan gafuur-xirka kolka lagu jiro dukaanada, suuqyada ganacsiga, maqaayadaha, meelaha diimaha iyo goobaha dhaqanka, nashaadooyinka isboortiga iyo xilliga firaaqa.

Tani waxay si taas u dhiganta u khusaysaa shaqaalaha jooga goobaha aanay suurto gelayn in soo booqdayaasha laysu jirsado masafo hal mitir ah.

Gafuur-xirka meelaha ganacsiga ee bixiya adeegyada tima jaridda, maqaar daryeelista, jir xardhista iyo jir daloolinta

Waxa lagu talinayaa in shaqaalaha iyo macaamiisha (dadwaaweyn) iyo dallinyarada jirta 12 sano iyo ka weyn ay isticmaalaan gafuur-xirka waa haddii aanay isu jirsan karin masafo ugu yaraan hal mitir ah.

Macaamiishu way iska qaadikaraan gafuur-xirka marka ay lagama maarmaan u tahay in adeegga loo fuliyo.

Gafuur-xirka tagaasida iyo gaadiidka dadweynaha

Rakaabku waa inay tagsiga u isticmaalaan gafuur-xir.

Gafuur-xirka waa in la xirto ka hor inta aan tagsiga gudahiisa la gelin, waana inaan layska furin inta uu safarku ka dhammaanayo oo kan rakaabka ahi ka baxayo tagsiga.

Si taa u dhiganta wuxuu waajibka gafuur-xirku khuseeyaa darawalka kolka uu rakaab ku jiro tagsiga gudahiisa.

Waa in gadiidka dadweynaha iyo gudaha rugta laga safro la isticmaalo gafuur-xir haddii qofku aanu kuwa kalee safraya ka durki karayn ugu yaraan masafo hal mitir ah.

Waajibka in la isticmaalo gafuur-xir ma haysto carruurta ka yar 12 sano, iyo kuwa arrimo caafimaad awgeed ama sababo kaleba aan u isticmaali karayn gafuur-xir.

Arrintani waxay khusaysaa gudaha tagaasida iyo gaadiidka dadweynaha.

Ciyaaraha fudud iyo dhaqanka

Dadka ka weyn 20 sano waxaa ciyaaraha nidaamsan lagu xaddiday ilaa 20 qof oo gudaha laysu jirsanayo ugu yaraan hal mitir, ama 30 qof oo dibedda laysu jirsanayo ugu yaraan hal mitir.

Sidoo kale waxay tani khusaysaa nashaadoyinka xilliga firaaqada sida tababbarada nidaamsan, tababbarada iyo boroobooyinka heesaha, muusikada iyo riwaayadaha.

Tababbarada nidaamsan iyo kuwa ciyaaraha loolanka ka qaybgala gudaha iyo banaankaba waa la oggolyahay iyada oo aan tirada la xaddidayn.

Hagayaasha isboortiga iyo dhaqanka ee degmadan Trondheim warkooda ugu cusub waxaa kuugu qoran xeerarka iyo waxqabadka jira.

Munaasabadaha

In kastoo shuruudaha kala fogaanshaha ee ku yaal den nasjonale covid-19 forskriften § 13c (xeerka qaranka ee covid-19 § 13c) la fuliyey, waa in aan la qaban munaasabado ay goob isku mar qof ahaan joogaan dad ka badan:

Isu imaatin birifaati ah

Isu imaatinka birifaatiga ah waa 20 qof oo keliya, dibeddana 30 qof si ay carruurta isku kooxda ah ee xannaanada carruurta ama carruurta dugsiga hoose ay u kulmi karaan iyagoo ay la joogaan tirada dadka waaweyn ee lagama maarmaanka ah ee qabanqaabiyayaasha ah.

Munaasabadaha gudaha lagu qabto

Way u furantahay in munaasabadaha gudaha ay isu imaan karaan ilaa 50 qof, iyadoo loo kala caddeeyey sidan soo socota:

- Waa 100 qof munaasabadaha isu keena ka qaybgalayaasha ka yar 20 sano ee isku degmo deggan. Sidoo kale waxay khusaysaa munaasabadaha isu keena ka qaybgalayaal ka yar 20 sano oo deggan degmooyin kala duwan, laakinse isku degmo kaga qaybgelaya tababbar nidaamsan, tababbar, boroobooyin iwm.

- Waa 50 qof xilliga arooska, aaska, gubitaanka iyo xafladda tacsida xabaasha.
- Waa 200 qof meesha ay daawayadaasho haystaan bar la fariisto oo tilmaaman.

Munaasabadaha bannaanka lagu qabto

- Waa 200 qof munaasabadaha bannaanka lagu qabto, laakiinse way u furantahay 300 qof meesha ay daawadayaashu haystaan bar la fariisto oo tilmaaman.

Munaasabadaha ay isku mar goobjoog yihiin in ka badan 100 qof, waa in goobjoo-gayaasha loo qaybiyo kooxo ilaa 100 gaaraya. Waa in mar walba kooxuhu isu jiraan ugu yaraan labo mitir.

Kooxaha ilaa 100 qof ah waa la beddelikaraa inta munaasabaddu ay socoto, waa haddii taas loo suubiyo si qumman oo aanay isu imaanayn.

Kuwan hoose kuma jiraan xisaabta

Dadka soo socda lagu xisaabinmaayo wadarta tirada dadka munaasabada goobjooge ka ahaan kara:

- Shaqaalaha iyo hawl fuliyayaasha u jooga qabashada munaasabadda
- Fannaaniinta fulinaysa nashaadad dhaqameed ay soo abaabuleen dad xirfadyaala
- Loolamayaasha, farsamo wadeenada iyo garsoorayaasha munaasabadda isboortiga
- Ciyaartooyda, farsamo wadeenada iyo garsoorayaasha fulinaya iska horimaadka wareegyada kubbadda cagta (wareegyada kubbadda cagta) sida ay ka go'aamiyeen Iskaashiga kubbadda cagta ee Norway waxay diyaar u wada yihiin inay raacaan nidaamka iskaashigu u dejiyey iyagoo kaashaday Agaasinka caafimaadka.
- Weriyayaasha, sawir qaadayaasha iyo kuwa kale ee ka wakiil saxaafadda ee aan looga maarmayn baahinta munaasabadda.

Munaasabadaha loogu talo galay dadka ka yar 20 sano ka mid bay yihiin dhammaan kuwa goobtaa jooga, oo ay ku jiraan kuwa wax suubinaya iyo farsamo wadeenada kolka la xisaabinayo wadarta guud ee dadka.

Goobaha cuntada iyo cabbitaanka qamrada (baar)

- Dhammaan goobaha maqaayadaha iyo meelaha qamrada laga shubo waa inay diiwaan geliyaan qof kastoo macaamiisha ah kolka ay yimaadaan.
- Degmada Trondheim way xirikartaa goobahaas cunada iyo cabitaanada ee ku dhaqmi waaya shuruudaha laga rabo ee ah meherad socodsiin leh ka hortag

habboon oo faafitaan caabuq iyo shuruudaha xeerkani dalbayo, eeg xeerka ka hortagga faafitaanka caabuqa § 4-1 xubinta saddexaad.

- Goobaha cuntada iyo cabbitaanku waa in aanay qaabilin isu imaatin birifaati ah oo ka badan 10 qof gudaha, ama 15 qof dibedda.
- Qamro waxaa laga gadi karaa oo keliya kuwa cunto laga gaday (ugu yaraan hal saxan).
- Qamro gadis waxaa laga reebay kolka konjeertooyinka iyo bandhigga riwaayadaha iwm ee lagu qabanayo masraxyo dhaqameed oo ujeeddada booqashadu ay tahay munaasabad dhaqameed iyo in tigidhada bandhigana la iibsaday.
- Maqaayadaha haysta ruqsada khamro gadista waa in aanay soo deyn macamiisha wixii ka danbeeya saacadda 21.00, waana in la joojiyo gadista qamrada saacadda 22.00, Cabbista cabitaan qamro ku jirto oo lagaa gaday waa in lagu laasto ugu badnaan 30 daqiiqo ka bacdi.

Xafiis-guriyeed

Waxaa lagu talinayaa in loo shaqeeyuhu uu sahlo in shaqaaluhu xafiis ahaan guryaha ku shaqeeyaan inta sidaasi ay baraatiko ahaan suuragalayso oo ay haboontahay waxayna ku xirantahay nooca shaqadu ay tahay.

Xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada

Dugsiyada hoose iyo xannaanooyinka carruurta waxaa weli lagu wadayaa heerka jaalaha, hase yeeshee si joogto ah ayaa loo qiimaynayaa hadba xaaladda faafitaanka caabuqa ee xilli kasta taagani sida ay tahay.

Laga bilaabo isniinta 14 ka yuunyo waxaa dugsiyada sare ee Trondheim lagu wadayaa heerka jaalaha.

Xeerarkan ayaa huteelka karantiinada khuseeya:

Halkan ayaad ka helaysaa xeerarka huteelka karantiinada ee ku saabsan kuwa gurya yimi ee ka soo noqday safar dalka dibeddiisa ah

[Lenke til regjeringens informasjon om karantenehotell](#)